Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

# Kooras ku saabsan bulshada Finland

## Caafimaadka jinsiyeed iyo jinsinnimada



# Xuquuqda jinsiga

Xuquuqda jinsiga ama galmada waa qeyb muhiim ah oo kamid ah xornimada qof walbaa iska leeyahay, waana arrin uu qof walbaa leeyahay.

Xuquuqda jinsiga waxaa loola jeedaa, in aad adigu xaq u leedahay go'aan ka gaarista arrimaha la xiriira noloshaada jinsinnimo. Ururka adduunka ee caafimaadka jinisiga ee marka magacaiisa la soo gaabiyo la yiraahdo (WAS) ayaa sameeyay bayaan, uu ku qoray in qof walbaa oo dadka ka mid ah uu leeyahay arrimaha ay ka midka yihiin:

- Xuquuqda xorriyadda jinsiga
- Xuquuqda ah go'aan ka gaarista aayaha jinsigiisa, in aan la taaban karin, iyo xuquuqda ammaanka jirka.
- Xuquuqda sinnaanta jinsiga iyo
- Xuquuqda tarbiyadda jinsiga



# Xuquuqda is maamulka

Finland gudaheeda qof walbaa wuxuu xaq u leeyahay in uu is maamulo. Waxaa arrinkaan loola jeedaa xuquuqda shakhsiyadeed ee xornimada qofka, in aan la taaban karin iyo midda ammaanka, taasoo sidoo kale ku saaban jinsiga iyo arrimaha la xirira ee taabsho la'aanta iyo xuquuqda is maamulista. Qof kasta oo Finland ku nool wuxuu xaq u leeyahay in uu go'aan ka gaaro jinsinimadiisa u gaarka ah iyo jirkiisa, sidoo kale guurka iyo xiriirka la socosho ee qofka uu doonayo.

## Faldambiyeed galmoosho

Dagaalka xagga jinsiga ama galmoodka waxaa uu noqon karaa fal kasta oo galmood ah, oo qofka lagu sameeyo, isagoo aan rabin arrinkaas. Falka galmo ee ikhtiyaariga ah waa in lagu muujiyaa qaab ah hadal, habdhaqan ama qaab kale. Sharciga Finland wuxuu diidayaa in galmood lala sameeyo qof ka yar da'da 16-ka sano, waana fal dambi ah.

**Adigoo aan oggolaansho u heysan ma samayn kartid arrimahan soo socda:**

- **Lama taaban karo agagaarka xubnaha taranka ama xubnaha dareenka kacsiga ah leh ee qof kale, amaba si guud ahaaneed lama taaban karo jirka qof kale**
- **Laguma caayi karo jinsi ahaan,**
- **Looma soo jeedin karo arrimo tilmaamaya galmood oo hadal ahaan, baaq ahaan ama qalab ahaan toonna,**
- **Lama qashqashaadi karo, lama magacaabi karo, lamana khaawisi karo,**
- **Laguma soo dejin karo baraha bulshada waxyaabaha dhaawici kara ee u gaarka ah**

## Falal dambiyeedyada carruurta ku wajahan

Xadka da'da ee Finland u degsan in galmood lala sameeyo qof kale waa da'da 16 sano.  Qof weyn ama qof kale oo dhalinyaro ah oo dad'diisu si cad uga weyn tahay 16 sano, wax galmood ah lama samyn karaan qof da'diisu ka yar tahay 16 sano. Falkaas waa mid ciqaab lagu mutaysanaayo, xitaa haddii ilmaha galmoodka lala sameeyay uu arrinkaas oggol yahay. Mas'uuliyaddu waxaa ay saaran tahay qofka weyn.

Isticmaalka jinsiga waxaa loola jeedaa in **ilmaha/qofka dhallinyarada ah** in lagu qalqaaliyo ama lagu khasbo falkaan galmoodka ama xagga jinsiga ah, iyadoo laga faa'iidaysanaayo darajada ama heerka u gaarka ah ee qofka, ka maarmid la'aanta ilmaha ama qofka dhallinyarada ah, ama inuusan lahayn awood uu iskaga difaaco. Falku wuxuu noqon karaa noocyada kale ee jinsiga ee aan ahayn xubinka taranka oo kan kale la geliyo. Tusaale ahaan faraxumeynta jinsiga waxaa ka mid ah dhibaateynta faraxumeynta, taataabashada, ka codsiga dhar iska saarista, sawir ka qaadista, sidoo kale qalqaalinta ama ku soo jiidashada dhanka internetka iyo baraha bulshada ayaa ah falal ay ka dhalanayaan xukun maxkamadeed. Faraxumeynta jinsiga ee ka bilowda internetka ama lagu sameeyo carruurta, waxaa loogu yeeraa ereyga ah Grooming.

# Caafimadka jinsiga

**Fahamka caafimaadka jinsiga**
Caafimaadka jinsigu waa qayb ka mid ah caafimaadka qofka. Waana awoodda uu qofku u leeyahay in uu ku raaxaysto jinsigiisa ama galmoodkiisa u gaarka ah, isagoo aan ka baqaynin, tusaale ahaan cudurada galmoodka, qaadista uur uusan doonaynin, takooris, dagaal ama rabshad, si xun ula dhaqmid, ama khatarta ah in cadaadis la saaro. caafimaadka jinsigu waa mid ku xiran xirirka u dhexeeya dadka, nololwanaagga jinsiguna waa mid muhiim u ah nololwanaaga guud ee dadka.

Caafimaadka jinsiga waxaa uu ka kooban yahay arrinka ah suurtaggalnimada uu qof walbaa go'aan uga gaari karo wax soo kordhinta xagga taranka ama joojintiisa iyo kahortagiisa. Caafimaadka jinsiga waa xorriyadda ah in uu qofku go'aanka gaaro waqtiga uu soo jeedin karo, islamarkaana uu hirgelin garo rabiitaankiisa jinsigiisa ama galmoodka u gaarka ah. Fahamka jinsiga kuu gaarka ah, amaanka iyo dareenka ah in qofka sida uu yahay lagu aqbalay, ayaa ah mid kordhinaysa nololwanaagga jinsiga qofka u gaarka ah.

**Cudurrada guud ee galmoodka iyo ka hortaggooda**
Cadurrada galmoodka waa cudurro faafa oo ay sababaan bakteeriyo ama feyrus, kuwaasoo ku faafa galmada aan la qaadan wax cudurka ka badbaadinaya sida cinjirrageedka ama kondhomka. Kuma faafaan cudurradaasi goobaha dadka ka dhexeeya ee la wada isticmaalo sida musqulaha ama suuliyada iyo sawnooyinka. Kondhomka ama cinjirrageedka waa qalabka kaliya ee looga hortagi karo, oo qofkii si sax ah u itsicmaala uu ka badbaadinaayo cudurrada galmoodka. Waxaa waajib ah in qof kastaa uu leeyahay aqoon iyo xirfad ku filan oo uu kaga hortagi karo cudurrada galmoodka.

Cudurrada waxaa tusaale ahaan ka mid ah:

- Kalaamidiya
- HPV iyo nooca feyruska ee la yiraahdo kondylooma
- Herbes
- Jabto
- Cagaarshowga B iyo C
- Waraabow
- HIV
- Injirta shuunka.

Cudurrada galmoodku ma ahan kuwo mar kasta muuqda oo la arkaayo, waxaana dhici karta in ay noqdaan kuwo aan wax astaan ah lahayn. Haddii aad ka shakido in cudurrada galmoodka aad soo qaadday, sida ugu dhakhshaha badan islamarka aad shakiga dareentidba, waxaad arrinka kala hadashaa kalkaalisda caafimaadka ee xarada qaxootiga, waxaadna ka codsataa in ay baaritaan kuu dirto.

Waa arrin aad muhiim u ah in cudurrada galmoodka la daaweeyo, waayo cudurrada aan la daryeelin waxaa ay keenayaan khatarta ah, in cudurku uu sii faafo. Sidoo kale waxaa muhiim ah in islawaqtigaas la daryeelo qofkii aad galmoodka wada yeelateen, waana in cudurka loo sheego dhamaanba dadkii galmoodku idin dhexmaray. Sidaas ayaa lagu goyn karaa ama lagu joojin karaa in cudurkau uu dad badan ku faafo.

**Ka ilaali naftaada iyo qofka lammaanahaag ah cudurrada galmada lagu kala qaado!** Kondhomka ama cijirrageedka iyo kan loogu talaggalay galmada dhanka afka ah ayaa ah qaababka ugu wanaagsan ee la isticmaalo. Kondhomyada iyo kan loogu talaggalay ilaalinta galmada afka, waxaa Finland laga heli karaa farmashiyayaasha, dukaamada iyo dabakaayooyinka (kioski).

### Qaababka kahortagga

Waxaa jira qaabab kahortag ah oo lagu joojin karo haddii uusan qofku doonayn in uu uur qaado, waxaana tusaale ahaan ka mid ah kondhomka ama cnijirrageedka, kiniinga ka hortagga uurka, gariiradda kahortagga uurka, giraangirta kahortagga uurka iyo kaabsalka. Waxaadna qaabka adiga kugu haboon kala sheekeysan kartaa kalkaalisadaada caafimaadka. Haddii qalabkii kahortagga uurka uu wax kaa celin waayay oo aad ku fashilantay, waxaa jira in uurka aadan doonayn in aad qaado aad kaga hortagi karto kiniiniyaal kahortagga dambe oo lagu joojinaayo uurka. Awoodda kiniiniyaasha kahortagga dambe ay leeyihiin ama ay wax ku tari karaan, waa mudada ah 12 saac gudahood markii galmoodku uu dhacay. Si kastaba kiniiniyaasha kahortagga dambe ma ahan qaab ka hortag ah.

### Ilmo soo ridista (aboorshanka)

Finland gudaheeda ilmo soo ridista ama aboorshinku waa mid sharci ah oo la oggol yahay, kahor inta aan la gaarin toddobaadka 20-aad ee uurka. Ilmo soo ridistu ma han qaabka kahortagga ama joojinta uurka. Haddii aad arrinkaas u baahan tahay waxaad kala sheekeysan kartaa kalkaalisda caafimaadka.

## Gudniinka

### Gudniinka wiilasha ee aan caafimaadka la xiriirin

Gudniinka aan caafimaadka la xiriirin, waxaa loola jeedaa gudniinka la xiriira dhanka diinta ama sababo xagga dhaqanka ah, kaasoo xubinka taranka ee wiilasha laga gooyo buuryada soo laadlaadda ee haragga ah. Finland gudaheeda gudniinka noocaas ah ee aan caafimaadka la xiriirin, ma ahan mid sharciga dalka lagu diiday ama aanu oggolayn, laakiin waxaa loo arkaa in uu dhibaato ku

yahay ama dhaawac u gaysanaayo xuquuqda taabasho la'aanta ilmaha iyo xuquuqdiisa ah in uu arrimihiisa isagu xor u yahay.  Marka gudniinka noocaas ah ee xagga diinta ama dhaqanka la xiriira la samaynaayo, waa in rabitaanka ilmaha la dhegeystaa, islamrkaana uu noqdaa gudniin aan xanuun ku keeneyn ilmaha.  Dhakhtar sharciyaysan oo kaliya ayaa gudniinka samayn kara. Si gudniinka loo sameeyana waa in la helaa oggolaanshaha labada waalid.  Sidoo kale waalidku kharashka gudniinka iyaga ayaa iska bixinaya.

**Gudniinka gabdhaha (FGM)**

Gudniinka gabdhaha waa dambi. Gudniinka gabadhaha iyo haweenka waxaa loola jeedaa dhammaan wixii howl noocaas ah oo ku salaysan sabab dhaqan ahaan ah ama mid aan ahayn daryeel caafimaad, kaasoo la gaarsiiyo qaybta kore ee xubinka taranka haweenka ama la jarjaro ama qaab kale dhibaato loogu geysto.

Gudniinka gabdhaha wuxuu keenaa dhibaatooyin caafimaad, tusaale ahaan xanuun aad u daran, dhiig-bax, caabuq ama infekshan, xanuun galmoodka ah, haaro dhibaatooyin dambe keena, dhibaato xagga kaadinta ama kaleetinta ah, xanuun dhanka dhiigga caadada ah, iyo dhibaatooyin nafsad ahaaneed, sida cabsi, istarees, hurdo la'aan iyo riyooyin cabsi leh. Gudniinka waxaa ka dhalan kara dhibaatooyin xilliga uurka ah iyo waqtiga dhalliinka.

Gudniinka gabdhaha waa dhibaato xagga jinsiga ah oo loo geysanaayo gabdhaha. Finland gudaheedana sida uu dhigaayo sharciga dambiyada waa fal ciqab lagu mutaysan karo. Shaqada u taalla howlwadeennada dowladda waa in ay ilaaliyaan in aan gabdhaha lagu samaynin gudniin. Wixii khatar gudniin ah ee qofka la soo gudbonaada, waa in lagu wargeliyo ama loo sheego booliska iyo shaqaalaha badbaadada carruurta. Sidoo kale lama oggola in gabdhaha ku nool Finland dalka dibaddiisa la geeyo si loo soo jarjaro. Xitaa wixii jarjaris ama gogooyn gudniin ah oo hore loogu soo ameeyay, waxaa dhici karta in qofkii falkaas sameeyay ma'suuliyadda arrinkaas lagu qaado.

Haweeneyda ama gabadha la soo guday waxaa ay kalkaalisada xerada caafimaadka ka heli kartaa caawimaad, taageero, talosiin iyo macluumaad: haddii loo baahdana waxaa gabadha ama haweeneyda la soo guday loo diri karaa dhakhtarka.

# Barbaarinta ama wacyigelinta jinsi ahaaneed



Barbaarinta ama wacyigelinta jinsiga waa xuquuqda jinsi ahaaneed ee qof walbaa uu iska leeyahay, hadafka laga leeyahayna waa sidii loo taageeri lahaa loona ilaalin lahaa horumarka jinisga ee qofka. Finland gudaheeda barbaarinta jinsiga waxaa ilmaha iyo dhallinyarada lagu siiyaa koorasyada arrimaha bulshada, iyadoo ka qayb ah waxbarashada caafimaadka ee iskuulka. Finland gudaheeda arrinka jinisga waxaa loo arkaa, in uu yahay arrin wanaagsan, kaasoo muhiim u ah qiimeynta iyo qaddrinta qofka kale.

**Jinsinimada**
Jinsinimada waa qayb ka mid ah sifaadka qofka, waana qaybta ugu muhiimsan ee heerarka kala duwan ee nolosha qofka. Jinsinimada waxaa ka mid ah jirka qofka, habdahaqanka, fikirka iyo dareenka. Qof walbaa xagga jinsinimada wuu ka duwan yahay dadka kale, jinsinimadiisuna waa mid noocyo badan.

Jinsinimada waxaa sidoo kale ka mid ah xiriirka dadka kale aad la leedahay iyo qof noocee ah ayaad tahay marka dadka kale aad la socoto, tusaale ahaan sida aad ku tahay xiriirka lammaanaha ama xiriirka saaxiibtinamada. Howsha jinisinimada oo loola jeedo galmada, waa qayb ka mid ah habdhaqanka jinsiga. Khibradaha iyo dhacdooyinka kala duwan ee nolosha ayaa dhici karta in ay isbeddel ku sameeyaan habdhaqanka jinsinimada.

**U jiheysiga jinsinimada**
U jiheysiga jinsinimada waa sifo gaar ah, taasoo ka warramaysa cidda uu qofku ka helaayo, jecel yahay ama uu dareemaayo in xaggiisa loo jiidaayo. Qiyaastii 90 % dadku waa kuwo ah jinsi kala duwan, taasoo uu qofku dareemaayo in loo jiidaayo dhanka qof ka jinsi duwan isaga. Qiyaastii 10 % dadku waa khaniisiin (khaniis, lesbiyaan, bi), taasoo uu qofku dareemaayo in loo jiidaayo dhanka qof la jinsi ah ama qof la jinsi ah iyo mid ka jinsi duwanba.

Dastuurka dalkaan Finland wuxuu oggol yahay dhammaan jinsinimada noocyada kala duwan ah, sidaas awgeed ayuu dastuurku oggol yahay xiriirka khaniisnimada. Dalka Finland gudihiisa qof walbaa wuxuu xaq u leeyahay in uu u jihaysto dhanka jinsiga uu doonaayo. amaba in uu soo bandhigo arrinkaas, waana arrin qofka u gaar ah.

**Xuquuqda jinsinimo ee carruurta**
Jinsinimmada waa qayb ka mid ah qofka laga soo bilaabo islamarka uu dhasho, waana qayb ka mid ah korriinka caadiga ah ee ilmaha. Ilmuhu wuxuu u baahan yahay hagis, taageero iyo macluumaad la xiriira arrimaha ku saabsan jinsiga. Waalidka ayaana ah dadka ugu muhiimsan ee arrinkaan ilmaha ka haqabtiri kara. Sidoo kale Finland gudaheeda carruurta ku jirta da'da waxbarashada, waxaa ay macluumaadka arrinkaan ku saabsan ka helaan xisadda maadada caafimaadka ee iskuulka.

# Da'da baaluqidda waa marxalad aad muhiim u ah oo ka mid ah nolosha qofka. Waxaana ay ka kooban tahay isbeddelo badan oo dhanka fikirka iyo jirkaba ah.



Da'da qaangaarnimada waxaa bilaabanaysa marxaladda ah in wiilashu ay rag isu beddelaan, gabdhuhuna ay naago noqdaan. Isbeddellada dhanka wiilasha waxaa ka mid ah:

- Xiniinyaha iyo guska oo kora
- Codka oo isbeddala
- Korriin dhakhso ah
- Findoob ama finqooq
- Biyo bax habeenkii ah
- Isbeddelka dhanka fikirka.

Isbeddalada ku dhaca gabdhaha waxaa ka mid ah:

- Dhiigga caadada oo ku bilowda
- Naasaha oo kora
- Korriin dhakhso ah
- Findoob ama finqooq
- Isbeddelka dhanka fikirka.

Da'da qaangaarka waxaa ay qaadan kartaa dhowr sannadood, qaabka korriinka da'da qaangaarnimada waa mid qof walba u gaar ah. Inta ugu badan waxaa ay bilaabataa da'da u dhexeysa 8-14 sano jirka, waxaana ay qaadataa 3-5 sano. Waxaa qofka marka ugu horreysa ku dhaca isbeddelka xagga jirka ah, isbeddalka dhanka fikirka ah wuxuu qaataa waqti dheer.

Aqoonsiga ama jinsiyadda ilmuhu wuxuu noqdaa mid gaar ah inta lagu gudajiro marxaladda korriinka, waana in arrinkaas la ixtiraamaa. Qof walbaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ahaado sida uu yahay. Da'da qaangaarnimada waxaa bilaabanaya koritaan iyo horumar weyn oo dhanka qaangaarnimada loo qaado. **Ilmaha iyo qofka dhallinyarada ah wuxuu u baahan yahay taagerada hagista iyo fahamka dadka waaweyn**, si uu ugu koro, uuna ugu horumaro qaab aammaan leh. Dadka waaweyn iyo waalidka waxaa la gudboon in ay warbixin ku filan ka heystaan dhacdooyinka la xiriira korriinka iyo horumarka da'da qaangaarnimada, si ay u awoodaan in ay u siiyaan taageerada ay u baahan yihiin.

# Warbxinta, hagista, talosiinta iyo taageerada

Qof walbaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo macluumaad dheeraad ah, taageero iyo caawimaad la xiriirta xaaladaha dhibaatadu ay la soo gudboonaato. Waa arrin muhiim ah in qofku si geesinimo leh uu taageerada u codsado xilliga loo baahan yahay! Sidoo kale waxaa muhiim ah in ilmaha iyo dhallinyarada la hago, talo la siiyo lana taageero, si ay u helaan taageerada ay u baahan yihiin iyo macluumaadka saxda ah ee ku saabsan arrimaha la xiriira caafimaadka jinsiga. Arrimahaas waxaad ka soo raadsan kartaa kalkaalisada caafimaadka ee xerada qaxootiga! Si geesinimo leh u dalbo ballanka ku saabsan wadahadalka arrinkaas!

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service